**Tix: WC/XW/0054/MAJSI2025** **Tar: 14/Nov/2025**

**Ka:** Wasaarada dhalinyarada iyo ciyaaraha

**Og:** Xafiiska midawga ardayda

**Ku:** Kooxaha

**Uj:** Shuruudaha Cup-ka Soo Dhaweynta Ardayda semester-ka 1aad

Xafiiska midowga ardayda jaamacada SIU wuxuu ku guda jiraa sidii loo dar dargelin lahaa howlaha shaqo ee xafiiska horyaala oo uu ugu horeeyo isku xirka ardayda iyo iskaashikooda.

Sidaa darteed xafiiska ciyaaraha MAJSI wuxuu soosaaray oo uu lawadaagayaa kooxaha shuruudaha tartanka waxayna noqonayaan sidan hoos kuxusan;

***Qodobka 1-aad:* Diiwaangelinta.**

1. Diiwaangelinta ciyaaryahanada koox kasta waxaa laga rabaa 7 ciyaartoy, Mana la ogola diiwan galin kale.
2. Ciyaaryahankii mar team u safta ama u ciyaara uma ciyaari karo koox kale.
3. Number uu xidig ku ciyaaray xidig kale kuma ciyaari karo.
4. Ciyaaryahan kasta wuxuu u ciyaari karaa kuliyadiisa oo kaliya, tusaale ahaan hadii aad baranaysay kuliyada (**A**) Uma ciyaari kartid kuliyada (**B**).
5. Ciyaaryahanka udiwaan gashan kooxda waxaa labadali karaa hadii ay kutimaado dhibaato ama sabab cad oo uusan ugasii mid noqon karin kooxda isagoo la imaanaya cadayn lagu wada qanci karo.

***Qodobka 2-aad:* Wakhtiga imaanshaha garoonka.**

1. Koox kasta marka ay ciyaar leedahay, waa in ay kooxda keentaa garoonka ciyaarta nusasaac ka hor, wakhtiga loo qorsheeyey bilowga ciyaarta sida ku cad jadwalka.
2. Kooxdii kasoo dib dhacda wakhtiga bilowga ciyaarta (kick-off time) waxaa la sugayaa 15 daqiiqo, ka dibna waxaa laga qaadayaa dhibcaha, iyadoo kooxda garoonka timid loo qorayo 3 dhibcood iyo 3 gool (forfeit).
3. Kooxda ciyaarhanada garoonka ugalayaa kama yaraan karaan 4 ciyaaryahan, hadii ay dhacdo inay kooxda kayimaadaan wax kayar 4 ciyaaryahan waxaa laga qaadayaa dhibcaha
ayadoo kooxda garoonka sooxaadirtay lasiin doono 3 dhibcood iyo 3 gool (forfeit).

4. Kooxdii diida sii wadida ciyaarta iyadoo garoonka ku jirta waxaa loo fiirin doonaa saacada
   10 daqiiqo, kadibna waxaa dhibcaha lasiin doonaa kooxda kasoo horjeeda iyadoo natiijadu ay noqoneyso 3:0 (forfeit).

***Qodobka 3-aad:*** **Noocyda dharka kooxda.**

1. Kooxda waa inay xirantahay dharkii loo asteeyay dhamaan ciyaartoyda garoonka ku jirta looma ogolaan doono xidig aan wadan dharkii astaanta u ahaa kooxda.

***Qodobka 4-aad*****: Daqiiqadaha ciyaarta**

1. Daqiiqadaha ciyaarta waa 20 daqiiqo half-time kasta iyo wakhtiga gaaban ee garsoorku uu leeyahay oo uu ku dari karo ciyaarta.
2. Hadii ay dhacdo cilad farsamo wakhtiga waxaa kala qaybin doona garsoorka, tusaale hadii kulanka hore wakhti dheeri ah loo baahdo oo uu saamayn ku yeesho wakhtiga kulanka xiga iyadoo kulanka ka hor kooxaha loo sheegi doono daqiiqadaha ciyaartu sida ay noqon doonto.

***Qodobka 5-aad:*** **Habka dhibcaha iyo badinta.**

1. Badin - saddex dhibcood.
2. Barbaro - hal dhibic.
3. Laga badiyo - eber.

***Qodobka 6-aad:*** **Qaabka tartanka.**

1. Tartanka waxaa loo ciyaarayaa group-yo.
2. Group kasta waxaa kasoo gudbi doona 2 da koox ee ugu sareeya group-ka.
3. Goolasha aad dhalisay iyo kuwa lagaa dhaliyey qeybtooda oo la kala jaro **(farqiga goolasha).**
4. Goolasha ay dhalisay kooxdiina.
5. Haddii intaas lagu kala bixi waayo, waxaa la ciyaarayaa ciyaar bug bax ah (play-off).
6. Wakhtiga playoff ka waxaa go`aamin doona gudiga tartanka.

***Qodobka 7aad:*** **Ganaaxyada.**

1. Hadii ciyaartoy uu qaato 2 jaale inta uu socdo kulanka, guduud ayuu qaadan doonaa kulanka xigana wuu seegi doonaa wax racfaan ah malahan waxaa lamid ah midka sida tooska ah u qaata kaarka guduudan.
2. Jaalaha lama xisaabin doono kulanka kadib.
3. Kubada hadii xidig uu banaanka u saaro waa rigoore toos ah hadii ay kusii dhacdo ciyaaryahan kale misna ay banaanka jamacadda u baxdo waa rigoore ciyaaryahanka danbe ay ku sii dhacday ayaana laga dhigayaa rigooraha.
4. Hadii ciyaaryahan kooxda u ciyaara asagoo banaanka jooga uu garsoorku ciyaarta ka

maamuli waayo garsoorka ayaa ganaax lamida ka ciyaaryahanka garoonka ku jira siin kara.

5. Qofkii gudiga la hor yimaada wax ka baxsan dhaqanka waxbarashada iyo mida sportiga waxaa si toos ah go`aan uga gaari doona xafiisyada union-ka iyo xafiiska arimaha ardayda iyo midka sportiga.
6. Haddii uu ciyaartoy waxyeeleeyo ciyaartoy kale ama uu dadweynaha wax u geysto garsoorayaashana aysan arkin, waxaa talaabo ka qaadaya guddiga tartanka, iyagoo u cuskanaya hadba dambiga uu galay inta uu la'egyahay.
7. Kooxdii ama shakhsigii qaba cabasho waxa uu xaq u leeyahay in uu si qoraal ah ugu soo gudbiyo/gudbiyaan cabashada iyo aragtida tartanka 12 sacadood gudohood kadib kulanka.
8. Waxaa mamnuuc ah in kulanka inta uu socdo aad gudiga cabasho u keento.
9. Hadii uu ciyaaryahan qaato guduud wuxuu seegayaa kulanka xiga kulanka uu kuqaatay guduudka.
10. Hadii lagugu arko kuliyad adan wax ka baran adoo u ciyaaraya waxaad jabisay xeerka 1aad qodobkiisa 4aad laguumana ogolaan doono kulankaas.
11. Ciyaaryahan kasta waxaa waajib ku ah in uu sooqaato ID Card-kiisa jaamacadda.

***Fg: ardaygi lagu helaa dhaqan xumo ama wax ka baxsan dhaqanka ardaynimada wuxuu mari doonaa xeerka ciqaabta uga qoran xafiiska arimaha ardayda.***

***Fg: kuliyad kasta waxaa garwadeen ka ah oo lagala hadlayaa gudoomiyaha naadiga kaliya waxaa sii guud uga war qaba xafiiska spor-ska***

**MAHADSANIDIIN.**

**Xafiiska Midawga Ardayda**____________________

Tell/ Mobile: 252 – 61 – 3 299967, Email: studentsunion@siu.edu.so - www.majsi.siu.edu.so
Address: Midowga Ardayda Jaamacada SIU, Mogadishu-Somalia